Siyaasadda JICEC- QAYBINTA ARDAYGA WALXAHA AAN MANHAJKA AHAYN

Si loo hubsado nolol wannaaga iyo xuquuqda bulshada in si buuxda loo ilaaliyay, faafinta daabacaadyada ee aan dugsiga-laga maalgelin taasi oo uu ardaygu jeceylyahay in uu ku qaybiyo qaabka ugu dhakhsiyaha badan dugsiga gudihiisa iyo dhismooyinkiisa marka hore waa in loo gudbiyaa maamulaha dugsiga ama ku xigeenkiisa si loo helo oggolaansho. Maamulaha ama kuxigeenkiisa way diidi karaan faafinta qoraal kasta oo aan dugsigu-maalgelinin haddii asaga ama ayadu ay go'aansadaan qaab macquul ah in faafinta daabacaadu ay tahay nooc hadal aan banaanayn faafintiisa kaas oo hoos imaanaya qodobkan sharciga ah C.R.S. 22-1-120(3)**,** kaas oo soo socda ;.

(3) Ardaydu ma turjumi doonaan waxa ku jira lambarkan sirta ah si loo faafiyo ama loo qaybiyo marba hadii uu qoraalku ka kooban yahay waxyaabahaan soo socda:

a. Hadal fool xun oo galmada la xariira

b. Hadal been abuurasho ah, aflagaado ama sumcad ridis ah kaas oo hoos imaanaya qaanuunka dowladda

c. Hadal been ah oo ku aadan qof kasta kaasi oo aan ahayn qof caan ah ama aan ku lug lahayn arrimaha khuseeya dadweynaha

d. Hadal soo bandhigaya khatar cad oo muuqata oo ku saabsan ficilada gudiga aan qaanuunka ahayn, ku xadgudubka xeerarka qaanuuniga ah ee dugsiga, ama carqaladayn wayn ee ku saabsan waxyaabaha iyo hawsha nidaamsan ee dugsiga ama mida ku xadgudubta xuquuqda dadka kale.

Ardayda qaybinaysa walxaha ku xadgudbaya siyaasaddan /ama walxaha qof ama hantida dugsiga rasmiga ah u gaysan karta dhib hooseed aad u badan walxahaasi oo kale ardayda sameysa waxaa lagu amrayaa in ay u hoggaansamaan anshax marin ku habboon.

Ardaydu waa in ay yeeshaan xaq ay ku qaybin karaan kuna faafin karaan qoraalada ardayda ee aan dugsigu-maalgelinin iyo suugaan kale, sida wargaysyada, joornaalada, warqadaha,buuggaagta yaryar, iskuulka dhulkiisa iyo dhismihiisa qoraaladaasi oo u hoggaansan xudduda siyaasaddan iyo qaanuunka dowladda.

Maamulaha dugsiga ama kuxigeenkiisa waa in ay go’aan ka gaaraan qaybinta walax kasta oo asaga ama ayada u dhiibaan arday labo maalin oo buuxda oo maalmaha dugsiga ka mid ah laga bilaabo maalintii loo dhiibay. Walax kasta ee aan la oggolaanin ama la diido inta lagu guda jiro muddadan waxaa loo qaadanayaa in la aqbalay.

Haddii arday uu diido go'aanka maamulaha dugsiga ama kuxigeenkiisa, waxay xaq u leeyihiin in ay qortaan fayl codsi ah si uu dib ugu hubiyo kalkaaliye munaasab ah, maareeye ama qorshe

dejiye seddax maalmood gudahooda laga bilaabo marka la bilaabo go'aanka. Kalkaaliyaha maareeyaha ayaa bixin doona fursad ay qaybuhu ku soo bandhigaan sababahooda ay u diideen kadibna asaga ayaa qaadan doona go'aanka ugu dambeeya ee ku saabsan codsiga si uu dib ugu soo hubiyo seddax maalin gudahooda laga bilaabo maalintii dhageysiga.

Wakhtiga, Meesha iyo Qaabka Qaybinta

Wakhtiga, meesha, iyo qaabka loogu qaybiyo ardayga qoraalada ku waasi oo buuxinaya heerarka lagu dejiyay qoraaladii hore ee siyaasaddan ayaa waxaa looga habayn doonaa qaab macquul ah maamulaha ama qorshe dejiyaha, lagu sheegay xeerarkan oo kale:

1. Qaab isku xiran ayaa loo gudbin doonaa dhammaan qaababka daabacaada

2. Lama mamnuucayo qaybinta wakhtiyada ama meelaha, ha noqoto gudaha ama dibadda dhismaha dugsiga, taas oo aan xaqiiq aasaasi ah ku dhisnayn si uu uga mid noqdo soo dhexgal kasta oo soo dhex gala hawlaha dugsiga ka dhaca

3. Waa kuwo ku xaddidan meelaha iyo wakhtiyada qaybintu laga mamnuucay

4. Laga mamnuuci maayo qofna xaqa uu u leeyahay in uu oggolaado ama diido qoraal kasta oo la qaybiyay sida waafaqsan qawaaniinta

Siyaasaddan waa la qaybin doonaa, waa lasoo dhejin doonaa, ama hadii kale waxaa laga dhigayaa mid ay heli karaan dhammaan ardayda oo dhan iyo macalimiinta biloowga sannad kasta ee waxbarasho.

TIXRAACA SHARCIGA.: C.R.S. 22-1-120
C.R.S. 22-32-110 (1)(r)

TIXRAACA KALE EE LA EEGAYO.: JK, Dhaqanka iyo Anshaxa Ardayga

Qeexitaano

Qeexitaanada soo socoda waxaa lagu dabakhay shuruudaha lagu isticmaalay siyaasaddan:

1. Qaybin- faafin wayn oo ah walax la qorey qaab kasta oo ay noqoto taasi oo laga dhigayo mid si guud ay u heli karaan ardayda. Taasna waxaa ka mid ah ku dhejinta walxaha qoran hareeraha dugsiga taasi oo uu si guud ah ay ugu noq noqdaan ardayda.

2. Burcad – Kooxo ka kooban seddax ama wax ka badan kuwaasi oo wadaaga dan, xiriir, ama hawl, taas oo ku tilmaaman dembi ama dhaqan dembi fudud ah, una qabta hawsha si wadajir ah ama kalinimo ah.

3. Fuxshi

a. Qofka caadiga ah, ee lagu dabakhayo heerarka bulshada dugsiga casriga ah, wuxuu helayaa in walaxa qoran, loo qaadanayo gebi ahaan, soo jiidasho danayn shahwo ah.

b. Maadadu waxay sawiraysaa ama sharxaysaa, qaab cad oo weerar ah, dhaqan galmo ah sida ficilada galmada (caadi ah ama marin habaabin ah, dhab ah ama matalaad ah), siigaysi, muujinta xubnaha qabta hawsha saxarada, iyo soo bandhiga xubnaha taranka iyo halka ay ku yaaliin.

c. Maadadu, hadii loo qaato si guud ah, waxay la'adahay qiimo cilmi ah, farshaxan, siyaasad, ama suugaan dhab ah.

4. Canbaarayn, been abuurad, ama sumcad ridis-been,hadal aan lahayn fursad gaar ah ama hadal qoran oo ku saabsan dad xaddidan taasi oo loogu talagalay in dhib lagu gaarsiiyo dadka sumcadooda ayada oo hoos loo dhigaayo qadarinta qofka uu ku leeyahay bulshada dhexdeeda ama ka cabsiinta dadka kale ka qayb galkooda ama la dhaqanka qofka. Hadaladaasi oo kale ay ku jirto kuwa loogu talagalay ka shifaada qofka si ay dadweynuhu u nacaan, ceebayn, xaqiraad, jeesjeesid, ama sharaf ridid.

5. Qofka caanka ah – waa qof raadinaya ihtimaamka dadweynaha ama sifiican-loo garanayo guulaha uu gaaray darteed.